



SUPERINTENDENT OF PUBLIC INSTRUCTION

Randy I. Dorn Old Capitol Building · PO BOX 47200 · Olympia, WA 98504-7200 · <http://www.k12.wa.us>

Waa maxay Qiimaynta Aqoonta Luqadda Ingiriisiga Washington?

Qiimaynta Aqoonta Luqadda Ingiriisiga Washington (WELPA) ayaa ah imtixaan loo isticmaalo in la ogaado hadday ardaydu u baahan tahay taageero iyo in kale iyada oo loo maro Barnaamijka Kobicinta Luqadda Ingiriisiga (ELD) ee degmada. Qiimayntan ayaa ah imtixaanta aqoonta iyo xirfadaha akhriska, qorista, dhageysiga iyo ku hadalka Ingiriisiga. Ardayda dhigata dugsiga xannaanada illaa fasallada 12aad ayaa qaadata hal jeer sannadkii si loo qiyaaso intay ku koradhsadeeb barashada Ingiriisiga ee dugsiga dhexdiisa. Maadaama aqoonta iyo isticmaalka wanaagsan ee Ingiriisiga lama huraan u tahay ku guuleysiga dugsiga, waa muhiim inay ardayda u baahan caawimada dheeraadka ah ee barashada Ingiriisiga ay helaan caawimada ay u baahan yihiin.

Sidee ardaydu mutaysankaraan barnaamijka kobicinta luuqadda Ingiriisiga degmada?

Marka ardaydu is qoraan dugsiga, waalidka waxa la waydiiyaa “Ilmahaagu ma ku hadlaa luuqad aan Ingiriisiga ahayn?” Hadday jawaabtu tahay “haa”, ardaygu wuxuu qaataa Imtixaanka Meelaynta ee Qiimaynta ku Fiicnaanshaha Luuqadda Ingiriisiga Washington (WELPA). Ardayda keenta Heerka 1 (bilawga), 2 (dhexe), ama 3 (sare) Imtixaanka Meelaynta waxay u qalmaan caawimo dheeraad ah si ay u horumariyaan Ingiriisigooda.

Intee in leeg ayey ardaydu helayaan adeegyada barnaamijka kobicinta luuqadda Ingiriisiga degmada?

Ardaydu waxay sii wadanayaan barnaamijka ilaa intay u baahan yihiin caawimo Ingiriisiga ah. Imtixaanka Sannadlaha WELPA ayaa la bixiyaa si loo cabbiro korodhka ardayga ee aqoonta luuqadda Ingiriisiga iyo xirfadaha akhrinta, qorista, dhageysiga, iyo hadalka. Dhibicda Heerka 1, 2 ama 3 ee WELPA wuxuu go'aamiyaa in ardaygu sii wadan doono barnaamijka. Ardaydu si guul leh ayey uga wareegaan barnaamijka marka ay buuxiyaan shuruudda ka bixista WELPA.